

COVID-19

wargelinta dagganeyaasha



Abril 27, 2020

Bixinta kiradaada

Xasuusin inta ay jirto degdegga COVID-19, , Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) **ma qaban doonta lacagaha socodka-lagu-keeno xafiiska.** Waxaa haysataa dhowr siyaabo aad ku bixisid kirada, taasoo laga rabo maalinta kowaad ee bil kasta.

Ku bixi jeeg. Jeegga waa in aad u qortid “Toronto Community Housing” adiga oo qeybta "qoraalka" ("memo") ku qora Namarka Xisaabta Dagganaha (Tenant Account Number). Waxaad jeegaada u gudbin kartaa Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) adiga oo adeegsada:

Sanduuqa lagu riddo. Waxaad jeegga ama dalabka lacagta (money order) ku riddaa sanduuqa lagu riddo ee ku yaal xafiiska Maamulaha (Superintendent) ama xafiiska Qeybta Hawlaha (Operating Unit) ee xaafadda.

Boostada. Waxaad jeeg boostada ugu dirtaa xafiiska Qeybta Hawlaha (Operating Unit), saddax ilaa shan maalin la shaqeeyo ka hor inta aan la gaarin maalinta kowaad bisha si aad waqti u siisid geynta iyo shaqada laga qabto.

Bixi adiga oo isticmaala bangiga internetka (online banking). Ku dar bixiyaha “Toronto Community Housing Corporation” adiga oo lacag bixinta toos uga soo saaro xisaabta kaaga furan bangiga.

Bixi adiga oo isticmaala siistemka bangiga telefoonka (telebanking). Waxaad kirada toos uga bixin kartaa xisaabta kaaga furan bangiga adiga oo adeegsada telefoonka.

Ku bixi lacag bixinta horay-loo-ogolaaday (pre-authorized) (PAP). Isku qor bangigaada adiga oo u fasaxa in uu kiradaada toos uga soo saaro xisaabtaada una diro Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) maalinta kowaad ee bil kasta.

Si aad in badan uga ogaatid fursadahaan ama si aad u heshid foomka PAP, la xariir Xarunta Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre), telefoonka **416-981-5500** ama help@torontohousing.ca. Foomamka PAP waxaa kaloo lagala soo bixi karaa bogga internetka torontohousing.ca.



Wac **416-981-5500** si ogeysiiskan laguugu soo diro luqad ama qaab kale.